IIB MA GALO

# NTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

5aad Muqdisho 2 Luulyo 1977 L. 7

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**BIL SOO BAX** جريدة شهرية

waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya

waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K G O B N I I N

### S A X I D Q A L A D

Faafinta Rasmiga ah lamb. yahay 1 r 6 ee 10. Juunyo 1977,

1) Bogga 550, Xeerka L. 49, waa in loo akhriyo sida hoos ku qoran. Xeer Wasaaradda Hawlaha Guud.

2) Bogga 552, Xeerka L. 50 waa in loo akhriyo sida hoos ku qoran; Xeer Wasaaradda Hawlaha Guud.

3) Bogga 554, Xeerka L. 51 waa in loo akhriyo sida hoos ku qoran; Xeer Wasaaradda Hawlaha Guud.

## BOGGA KOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 41 ee 26 Maajo 1977, *Sharciga Habka Maktabadaha Soomaaliyeed* Bogga 627

SHARCI L. 42 ee 26 Maajo 1977, *Aqoonsiga Ruqsadda Wadidda Maraakiibta.* » 632

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

LAW No. 42 26th May 1977, *Granting certificate of competence to marine officers.* 632/Bis

## BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 16 Maajo 1977, *Hoose lagu faahfaahinayo Sharciga Shaqaalaha Dibedda lambarkiisu yahay 36 ee 26 Abriile 1973 L. 54* » 633

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 27.2.77. *Siismo dhul Dawladeed la siiyey Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga kuna yaal Muqdisho degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq. 217.770 L. 55* » 636

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, ee 2.3.77. *Magdhow guri oo la dumiyey dan guud awgeed jidka Baladweyne — Burco — kuna yaal Tuulada Baraadweyn L.. 56* » 637

XEER WASAARADDA HAWLAHA Guud ee 18.3.77 *siismo dhul Dawladeed la siiyey Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa Lagana dhisaayo Cosbitaal xooleed (Kilinic) ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq. 2.729.60 L. 57* » 638

### *BOGGA SADDEXAAD*

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 16.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Ruun Suleymaan Rooble L. 277* » 639

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 16.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Xaawo Daahir Cabdi L. 278* » 640

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 16.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Saciid Cusmaan Xaaji L. 279* » 641

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 16.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Maxamed Axmed Nafar L. 280* » 642

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 16.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Cabdulqaadir Muuse Xaaji Aadan L. 281* » 643

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 16.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Caydiid Cali Ducaale L. 282* » 644

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Maxamed Cabdullaahi Axmed L. 283* » 645

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Cabdullaahi Yuusuf Cabdi L. 284* » 646



WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Maxamed Macallin Qaasim L. 285* » 647

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Aadan Ciid Cali L. 286* » 648

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Maxamuud Bile Maxamed L. 287* » 649

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Khadiija Xaaji Cali Saalax L. 288* » 650

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Jaalle Faaduma Seyed Cusmaan L. 289* » 651

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Xasan Samantar Jaamac L. 290* » 652

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Jaalle Raxma Fachiye Cali L. 291* » 653

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Jaalle Daahir Salaan Yuusuf. L. 292* » 654

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Jaalle Neciima Suleymaan Cartan L. 293* » 655

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 19.5.1977, Naada *Dhul Maxamed Muuse Xaaji Aadan L. 294* » 656

Wasaaradda Howlaha Guud 26.5.77, *Naada Dhul Jaalle Faarax Raage Jaamac L. 294/Bis* » 657

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR ee 29.5.77, *lumid Buugga Keydka L. 12.619 ku qoran Sh. So. 200 uu leeyahay Shiikh Cabdi Gacal L. 295.* » 658

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 12.6.77, *Lumid Buugga L. 11964 uu leeyahay Aaden Hilowle Macalin L. 295/Bis 659* » 659

Maxkamadda Gobolka Banaadir 21.6.77, *Lumid Buugga L. 1614 uu leeyahay Maxamed Xaaji Shukhey L. 295/Bis* » 660

BOGGA KOOWAAD

# S H A R C I

SHARCI L. 41 ee 26 Maajo 1977, Sharciga habka Maktabadaha Soomaaliyeed.

## MADAXWEYNAHA

## J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashidii koowaad iyo tan labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga 1 ee soo baxay 1 Luulyo 1976.
yo 1976.

ISAGOO ARKAY: Sharciga 1 ee soo baxay 1 luulyo;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Dalka laga dhiso Maktabado lagu daryeelayo kor u qaadidda heerka waxbarashada ee Ummadda Soomaaliyeed iyo in la sameeyo hab lagu maamulo Maktabadaha;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare;

ISAGOO TIXGELINAAYO: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada.

## WUXUU SOO SAARAYAA

## SHARCIGA HOOS KU QORAN

### Qodobka 1aad

### Caddeyn

Eerayada soo socda waxaa loola jeedaa sida hoos ku qoran:

b) Guddiga Maktabadaha: waxaa loola jeedaa Guddiga talo ka bixin doonaa maamulka Maktabadaha ee lagu dhisay sharciga L. 80 ee 1.10.76;

t) Maktabad: waxaa loola jeedaa meel si nidaam leh lagu keydinaayo buugaag iyo jaraa'idyada iyo wax allaale wixii ku saabsan xusuus ha ahaadaan wax la dhegeysan karo ama la arki karo (Cajalado Filimo, iwm) iyo dokumeyntooyin loogu tala galay in la gaarsiiyo dadweynaha;

j) Agaasime: waxaa loola jeedaa Agaasimaha waaxda Maktabadaha isla markiina ah Agaasimaha Maktabadaha Qaranka.



### Qodobka 2aad

### *Dhisidda Maktabadaha*

1. Iyadoo la tixgelinaayo baahida dadweynaha u qabo Maktabado waxaa dalka gudihiisa laga dhisayaa Maktabado iyadoo tan dhexe ee Ummadda ku dooli doonto Xamar.

2. Maktabadda Dhexe waxay noqonaysaa waax ka mid ah Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

### Qodobka 3aad

### *Ujeeddooyinka Maktabadaha*

Ujeeddooyinka loo dhisay Maktabadaha waa kuwa soo socda:

1. In kor loo qaado aqoonta dadweynaha iyo in la xoojiyo aqoonta dalka taal iyo habka fidinaya;

2. In dadweynuhu si sahlan u helo buugagga, qoraallada iyo wax allaale wixii aqoonta lagu kaydiyo laguna fidiyo;

3. In kor loo qaado cilmi baarista dalka;

4. In la abuuro dhaqan wax akhris oo Ummadeed.

### Qodobka 4aad

### *Guddiga Maktabadaha*

Si loo hirgeliyo ujeeddooyinka ku xusan sharcigan waxaa la dhisayaa Guddiga Maktabadaha, Guddigaas wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda hiddaha iyo Tacliinta Sare; Guddoomiye

t) Agaasimaha Waaxda Maktabadaha Ummadda Xoghaye;

j) Wakiil ka socda Xisbiga X.H.K.S. Xubin

x) Wakiil ka socda Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Xubin

kh) Wakiil ka socda Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta dadweynaha Xubin

d) Wakiil ka socda Jaamacadda Ummadda, Xubin

2. Guddigaas waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Qodobka 5aad

*Hawsha Guddiga*

Guddiga waxaa waajib ku ah:

1. Inuu talo ka bixiyo meelaha ku habboon, una baahan in laga dhiso Maktabado;
2. Inuu sameeyo hab wanaagsan ee lagu maamulayo Maktabadaha laga dhisayo Dalka;
3. Inuu ugu talo galo dadweynaha helidda Buugaagta Jaraa'idyada masawiryaasha, cajalooyin iyo wax allaale wixii ay u baahan yihiin dadka waaweyn iyo carruurtaba, iyadoo kor loogu qaadaayo aqqoontooda iyo kasmadocda siyaasiga ah ee Hantiwadaagga;
4. Inay ku abuuraan bulshada dhaqan iyo jacayl wax akhris si wax akhrisku u noqdo kordhiyaha iyo maaweeliyaha dadweynaha;
5. Inay kor u qaadaan cilmiga, tababarna u furaan dadka ka shaqeeya Maktabadaha;
6. Inay uruuriyaan soona saaraan warbixin iyo tirakoob ku saabsan hawsha Maktabadaha;
7. Inay isku xiraan Maktabadaha Dalka oo dhan.

Qodobka 6aad

*Awoodda Guddiga*

Guddiga Maktabadaha wuxuu leeyahay awood talo bixin ee ku kooban:

1. Inuu Maktabadaha u kala wareejiyo wixii buugaag ah, qoraallo iyo qalab ah ee yaal meel aan looga baahnayn, dhigaana meeshii ay ku habboon yihiin;
2. Inuu qoro Biblograadiya dalka (National Bibliography)
3. Inuu talo ku yeesho qorsheenta Mijisaaniyadda iyo maalgelinta loogu tala galay maamulka Maktabadaha Dalka;
4. Inuu ka taliyo Sharciyeynta, xeer nidaaminta dhaqanka iyo maamulka Maktabadaha Dalka oo dhan;
5. Inuu isu xil saaro horumarinta, iskuduwidda, ahismaha, iyo qorshaynta maktabadaha Dalka;
6. Inuu wax ka qabto tababaridda iyo abuuridda shaqaale ku habboon kuna filan maamulidda Maktabadaha;



7. Inuu gacan ku siiyo Maktabadaha Dalka sidii ay xiriir ula yeelan lahaayeen Maktabadaha shisheeyaha, kuna dhiirri geliyaan isdhaafsiga waaya-aragnimada buugaagta, qalabka iyo qoraallada.

Qodobka 7aad

Maktabadaha Qaranka waa in la siiyo laba koobi lacag la'aan ah wixii kutub ah ama qoraal ah ee Dalka Gudihiisa ka soo baxa.

Qodobka 8aad

*Fadhiyada Guddiga*

1. Guddiga waa inuu fadhi yeeshaa 4 goor sannadkiiba. Hase yeeshee wuxuu isugu imaan karaa fadhi aan caadi ahayn markii loo baahdo isagoo isugu yeerayo Guddoomiyaha Guddiga.

2. Goaannada uu gaarayo Guddigu waa inuu ku gaaraa, marka fadhiga laysugu yimaado, waana inay ahaadaan kuwa ay isku raaceen intooda badan, ayadoo la qorayo ra'yiga uu qabo qof kasta oo ka mid ah Guddiga.

Qodobka 9aad

*Agaasimaha Waaxda Maktabadaha*

Agaasimaha Waaxda Maktabadaha wuxuu noqonayaa Xoghayaha Guddiga wuxuuna mas'uul ka yahay waxyaabaha soo socda:

b) Inuu soo saaro warbixinnada ku saabsan hawsha Maktabadaha;

t) Inuu hordhigaa guddiga Maktabadaha warbixinta sannadka ee ku saabsan hormarinta iyo dhibaatooyinka Maktabadaha;

j) Inuu diyaariyo qorshaynta ku saabsan horumarinta Maktabadaha hordhigaana Guddiga;

x) Agaasimaha Waaxda Maktabadaha isla markiina waxaa weeye Agaasimaha Maktabadaha Qaranka.

Qodobka 10aad

*Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka ee Maktabadaha*

1. Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare wuxuu magacaabi karaa Guddiyo Gobollo iyo Degmooyin oo maamula hawsha Maktabadaha ee Gobollada iyo Degmooyinka isagoo la tashanaya Guddiga Dhexe ee Maktabadaha.

2. Shuruudda looga baahan yahay xubnaha, hawsha iyo awoodda Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka waxaa lagu caddayn doonaa xeer nidaamiye Dawladda.

3. Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka ee Maktabadaha waa inay u soo diraan warbixintooda Agaasinka Waaxda Maktabadaha ee uu ka xil saaran yahay u bandhigga Guddiga Dhexe ee Maktabadaha.

4. Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka ee Maktabadaha waxaa xil ka saaran yahay dhismaha iyo horumarinta Maktabadaha Gobollada iyo Degmooyinka.

Qodobka 11aad

*xeer Nidaamiye Dawladeed*

Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacluntа Sare isagoo tixgelinaya talooyinkii uu soo jeediyo Guddiga Dhexe ee Maktabadaha, wuxuu soo saari doonaa Xeer Nidaamiye Dawladeed oo lagu fulinaayo Sharcigan.

Qodobka 12aad

*Tirtirid*

Sharci kasta oo khilaafsan ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 13aad

*Dhaqaqn gelid*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26 Maajo 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 42 ee 26 Maajo 1977 Aqoonsiga Ruqsadda wadida Maraakiibta.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ku Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 17,18,19, ee soo baxeen 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. yahay 1 ee 1.7.1976;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Taladii Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha;

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida weyn ee loo qabo in la sameeyo xaashiyo aqoonsi ee ku saabsan kartida iyo awoodda saraakiisha Soomaaliyeed ee kaxeeya Maraakiibta Baayacmushtariga ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda XHKS ,iyo Golaha Wasiirrada Taarikhdiisuna ahayd 5.5.1977.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Waxa u bannaan Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha, inay bixin karto xaashiyaha Aqoonsiga ee ay Saraakiishu ku kaxeeyaan Maraakiibta Baayacmushtariga ah iyo kuwa Dawladdaba (Competency Certificates).

Qodobka 2aad

Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha waxa uu sameen doonaa xeer uu ku tifatiri doono wixii shuruudo ah ee lagu xidhaayo bixinta Aqoonsigaas.

Wasiirka Wasaaradda gaadiidka Badda iyo dekadaha waa inuu xeerkaas ku magacaabaa guddi sare oo ku habboon inay imtixaan ka qaado dadka doonaaya inay imtixaankaas ka qayb qaataan iyo shuruudaha la rabo inay dadkaasi buuxiyaan intii aan loo oggolaanin imtixaankaas.

Qodobka 3aad

Wax allaale wixii sharci ah ee khilaafsan ama ka horjeeda sharcigaan waa la buriyey.

Qodobka 4aad

Sharcigan waxa lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda wuxuuna dhaqan geli doonaa 26 Maajo 1977.

Muqdisho, 26 Maajo 1977

LAW: No. 42 26th May 1977 Granting certificate of competence to marine officers.

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN: The 1st Charter and the 2nd of the Revolution of 21st October 1969;

HAVING SEEN: The law No. 2 of 1.7.1976;

HAVING HEARD: The proposal of the Ministry of Marine Transport and ports;

CONSIDERING: It necessary to grant certificates of competency to Somali Officers mannnig comercial ships;

TAKING NOTE: The approval of the political bureau and council of the Ministers on date 5.5.1977.

Hereby Promulgates

the following Law:-

Art. 1

The Ministry of Marine Transport and ports is the sole authority to grant certificates of competency to officers manning comercial and state ships.

Art. 2

The Ministry of Marine Transport and Ports shall enact a decree detailing the conditions governing the granting of such certificates of competency. In accordance to that the Minister will nominate a highly qualified commission to examine the knowledge and ability of the participants of such examination in order to be granted certificate of competency having fulfilled the conditions so demanded by the above decree.

Art. 4

This law shall be pubblished in the Official Bulletin of the Republic. This law shall come into force on the 26th of May 1977.

Mogadishu, 26 May 1977.

*PRESIDENT*

*OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC*

*Major General Mohamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16 Maao 1977, xeer hoose lagu faahfaahinayo Sharciga Shaqaalaha Dibedda lambarkiisuna yahay 36 ee 26 Abriil 1973 L.54.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kn Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 17, 18, iyo 19 ee soo baxeen 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda lambarkiisuna yahay 9 ee 8dii September 1971; iyo sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26 Abriile 1973 (Foreign Service Law);

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 5tii Jannaayo 1976 (Mideynta iyo habaynta Gunnooyinka xilka, xirfadda, Guriga iyo Habeen-dhaxa);

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Kalfadhigii 3aad ee Guddiga Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed lambarkiisuna ahaa XKS/068/S/77 ee 19.1.1977.

Wuxuu soo saarayaa xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la gartay in la mideeyo darajooyinka iyo jagooyinka Wasaaradda Arrimaha Dibedda sida soo socota:

Xoghayaha joogtada ah (permanent secretary)

Agaasimaha Guud

Danjire

Qunsul Guud/Lataliye/Qunsul

Xoghaye 1aad, 2aad, 3aad

Ku-qaybsanayaal

Karaani



Farsamayaqaan (Technical staff)
Adeege/Ilaaliye

II. Darajada Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda waxay tahay A/1.

III. Waaxyihii Wasaaradda Arrimaha Dibedda waxaa la gaarsiiyey heer Agaasin Guud. Darajadeeduna tahay A/2.

Qodobka 2aad

1. Waxaa la gartay in Shaqaalaha Xarunta Wasaaradda Arrimaha Dibedda la siiyo Gunno gaar ah sida hoos ku qoran:

| | | |
|---|---|---|
| Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda<br>Gunno gaar ahaaneed (special allowance)<br>Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda | 1,200 | Bishii |
| Gunno gaar ahaaneed (specia allowance)<br>Lataliye Cousellor | 1000 | Bishii |
| Gunno gaar ahaaneed (special allowance)<br>Xoghayayaasha/Secretaries | 800 | Bishii |
| Gunno gaar ahaaneed (Special allowance)<br>Ku-qaybsanayaal Diplomatic Attaches | 450 | Bishii |
| Gunno gaar ahaaneed (special allowance)<br>Karaani Taypist | 400 | Bishii |
| Gunno gaar ahaaneed (special allowance)<br>Farsamayaqaannada (Technical Staff) | 300 | Bishii |
| Gunno gaar ahaaneed (special allowance)<br>Shaqaalaha hoose auxiliary staff | 250 | Bishii |
| (Adeege, Ilaaliye, iwm) Gunno gaar ahaaneed | 200 | Bishii |

II. Jaamiciga ku soo biira Wasaaradda Arrimaha Dibedda wuxuu leeyahay gunno Sh. So. 700 bishii, taasoo la siman Gunnooyinka ku xusan sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 5tii Jannaayo 1976. Gunnada kor ku tilmaaman heli maayo haddii la siiyo guuno xil.

III: Shaqaalaha kaydinta sirta iyo hawlaha la mid ah waxay lee- Sh. So. 700 bishiiba.

IV. ku xusan waxba kama bedde- Wasaaradda ku qaataan sida

Qodobka 3aad

*Gunno Waxbarasho*

lee-

xeer hoose uu soo

Qodobka 4aad

*Farsamayaqaan*

Intii ay suuragal noqon, karta, waxaa la guddoomiyey in shaqaalaha Farsamayaqaan ah loo diro Safaaradaha J.D.S. kharajkoodana waxaa laga bixinayaa miisaaniyadda Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

Qodobka 5aad

*Ku noqosho Gunnada Dibedda*

Waa in dib loogu noqdo (review) gunnooyinka diblomaasiyiinta labadii sannadood mar, si laysugu dheellitiro maciishadda iyo gunnooyinka.

Qodobka 6aad

*Haysasho magac*

Danjiraha markii xarunta Wasaaradda Arrimaha Dibedda loo soo beddelo, wuxuu haysanayaa magac Safiir.

Qodobga 7aad

*Fasax*

Sida ku qoran Qodobka 16aad iyo sharciga shaqaalaha Dibedda, diblomaasiga marka uu fasax dalka ku yimaado wuxuu leeyahay gunnadiisa oo dhan bisha uu fasaxa ku jiro.

Qodobka 8aad

Kiro Guryo

Wasaaradda Arrimaha Dibedda waa inay xeer hoose u samaysaa si loo fuliyo sharciga shaqaalaha Dibedda gaar ahaan qodobadiisa kala ah 20, 23.

Qodobka 9aad

Waxaa la buriyey xeer kasta oo aan la socon karin ama ka soo horjeeada xeerkan.

Qodobka 10aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa durba, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD EE 27.2.77 L. 55 Siismo dhul Dowladeed, la siiyey WASAARADDA SHAQADA IYO ISBOORTIGA kuna yaal Muqdisho — DegmadaWardhiigley — kuna fadhiya mq. 217.770.-

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Koowaad, labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1 Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka dalka ee la wareegtay Xisbiga Hantiwaddaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii September 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1976;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. yahay DG/VIII-6/2086/76 taariikhdeeduna ahayd 26.4.1976 ee ay soo qortay Wasaaradda shaqada iyo Isbooriga oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Dugsiga Tababarka Farsamo Gacameedka;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sah. ka tirsan Qaybta Farsamada Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud. taariikhdeeduna ahayd 12.5.1975;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey WASAARADDA SHAQADA IYO ISBOORTIGA dhul Dowladeed ee cabirkiisuna yahay mt. $\frac{550+487}{2} \times 420$ wuxuuna la mid yahay 217.770 mdh. kuna yaal Muqdisho — Degmada Wardhiigley.

SOOHDIMAHA:-

Waqooyi waxaa ka xiga dhul Dowladeed.
Koonfur waxaa ka xiga W A D D O.
Galbeed waxaa ka xiga waddada Maxamuud Xarbi.
Bari waxaa ka xiga Waddada Jen. Daauud.

Muqdisho: 27.2.77

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 4
Muqdisho, 20 MAR. 1977.
Xu xigeenka hantidhawraha Guud
*Yuusuf Cali Nuur.*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, EE 2 MAARSO 1977

Magdhow Guri oo la dumiyey Dan Guud awgeed Jidka Baladweyne Burco — kuna yaal Tuulada Bacaadweyn L. 56

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

— Waaxda Dhismaha iyo Dhulka —

ANNAGOO ARAGNAY: Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxday 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Xeer lamb. 41 soona baxday 13.9.1973, Qodobka 9aad;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda qiimaynta guriga oo ay soo sameeyeen Guddi loo xilsaaray kana kooban:-

Agaasimaha W. H. GUUD Inj. XUSEEN CABDI MAXAMED iyo Sahmiye W. H. G. Gobolka Mudug CABDIRAXMAAN XUSEEN JAAMAC, iyo AXMED XIRSI AADAN, taasoo muujinayso qiima dhan Sh. So. 3.032 + 5.037 = Sh. So. 8.069/= (Sideed kun iyo lixdan iyo sagaal) eeg qiimaynta halkan ku lifaaqan;

WAA LA HUBSADAY: In Dadka Guryaha laga dumiyay ay yihiin kuwa magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, qiimaha Guryahooduna mid walba ku hor qoran yahay;

1) MAXAMUUD XAAJI CUMAR XUSEEN SH. SO. 3.032/=

2) MOXAMED SACIID JAAMAC CABDULLE » 5.037/=

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo dumiyey Dan Guud awgeed Guryaha ay lahaayeen Jaalleyaasha kor ku qoran, iyadoo loo celinayo magdhow gaaraya Sh. So. 8.069/= Sideed kun iyo lixdan sagaal). Sida ay muujinayso warqadda qiimayntu.

Lacagta kor ku qoran waxaa bixinaya Wasaaradda Maaliyadda.

MUQDISHO, 2 MAR. 1976.

XOGHAYAHA WASAARADDA MAALIYADDA
*Dr. Cabduraxmaan Nuur Xirsi*

*XOGHAYAHA W. HAWLAHA GUUD*
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 7
Muqdisho 22 MAR. 1976.
Hantidhawraha Guud
*G/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

XEER Wasaaradda Howlaha Guud; ee 18.3.1977

Siismo dhul Dowladeed, la siiyey Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa lagana dhisaayo Cosbitaal xooleed (Kilinic) kuna fadhiya mq. 2.729.60 L. 57

Xooleed (Kilinic) kuna fahiya mq. 2.729.60 L. 57

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

— Waaxda Dhismaha iyo Dhulka —

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Koowaad, labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1 Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Seteember 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lamb. WXD/1/11/5075 taariikhdeeduna ahayd 26 LUG. 1975 oo ay soo qortay Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa oo ay ku weydiisaneyso in la siiyo dhul laga dhiso Cosbitaal xooleed — Degmada Wardhiigley;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sah. ka tirsan Qaybta Farsamada Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taariikhdeeduna ahayd 30 Agoosto 1976;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey WASAARADDA XOOLAHA, DHIRTA IYO DAAQA dhul Dowladeed ee cabirkiisuna yahay mt. 60,60;32;80;27;20;20; wuxuuna la mid yahay 2.729,60/= qaabkiisuna yahay (L) ELLE

SOOHDIMAHA:-

Waqooyi waxaa ka xiga W A D D O.
Koonfur waxaa ka xiga W A D D O
Galbeed waxaa ka xiga W A D D O
Bari waxaa ka xiga gal Lamb. 553/1959.

Muqdisho 18.3.1977

*Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud*
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 11
Muqdisho, 5 MAG. 1977.
Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
*Yuusuf Cali Nuur.*

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### *N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Ruun Suleymaan Rooble u soo qorarji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 4.4.77 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh, soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO + Dhul lam 269K

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaaa ka xiga Dhul lam 240K

Bari waxaa ka xiga: Dhul lam 242K

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 16 MAG 1977.

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L.277

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Xaawo Daahir Cabdi u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 13.4.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam 380

Galbeed waxaa ka xiga: W A D D O

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam 377

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 16 MAG 1977.

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 278



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Saciid Cismaan Xaaji u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 4.6.1976 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; Soohdimiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam 3

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam 14

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam 16

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 16 MAG 1977.

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L.279

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Xafar u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 29.3.1977 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: DHUL L. 373

Galbeed waxaa ka Xiga: J I D

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul L. 370

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 16 MAG 1977.

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*
*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 280



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabduqaadir Muuse Xaaji Aadan u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 18.4.1977 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi Waxaa ka Xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 441

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 438

B a r i Waxaa ka xiga: WADDO

Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqdhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 16 MAG 1977.

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*
*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 281

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### *N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Ceydiid Cali Ducaale u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 4.2.1977 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisu yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh; Soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 387

Galbeed waxaa ka xiga: W A D D O

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam 384

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 16 MAG 1977.

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 282



## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### *N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdulaahi Axmed u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 26.3.1977 uu ku weeydiisanaayey Gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 367

Koonfur waxaa ka xiga: J I D

Galbeed waxaa ka xiga: J I D

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 374

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNIDIID*

L. 283

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Yuusuf Cabdi u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 5.4.1977 uu ku weydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=; soohdimihiisuna yihiin Sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: J I D

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 374

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 369

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 371

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNIDIID*

L. 284



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Mocalim Qaasim u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2.1.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; Soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: J I D

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 395

Galbeed waxaa ka xiga: J I D

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam 392

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNIDIID*

L. 285

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Aadan Ciid Cali u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalinta taariikhdu ahayd 10.1.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam 381K

Galbeed waxaa ka xiga Dhul Lam 376K

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam 378K

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*
*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNIDIID*

L.286



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamuud Bile Maxamed u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2.3.1977 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: W A D D O

Galbeed waxaa ka xiga: W A D D O

Bari waxaa ka xiga: Dhul la: 406 + 407

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*
*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNIDIID*

L. 287

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Khadiija Xaaji CaliSaalax u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 18.8.1976 uu ku weeydiisanaayen gabal dhul Dowladeed ah ee oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 28X20 kuna fadhiya 560/=Mdh; Sookdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 244K

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 270K

Bari waxaa ka xiga: W A D D O

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*
*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNIDIID*

L.288



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

a

uu

Tilmaaman:

W A D D O

Dhul Lam. 407

Dhul Lam. 408

o

soo qoro

19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*
*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 289

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Xasan Samantar Jaamac u soo qorttay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 21.2.1977 ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30/+ kuna fadhiya 600/Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku Tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 318

Koonfur waxaa ka xiga: W A D D O

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 311

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam. 313

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L.290



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Raxma Faahiye Cali u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 22. 77 uu ku weeydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/+Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 391

Koofur waxaa ka xiga: W A D D O

Galbeed waxaa ka xiga: W A D D O

Bari waxaa ka xiga Dhul Lam. 396

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L.291

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

— Waaxda Dhismaha iyo Dhulka —

*N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Daahir Salaan Yuusuf u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 13.4.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 393

Koonfur waxaaa ka xiga: W A B D O

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 396

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam. 398

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 292



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

*N A A D O  D H U L*

qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Naciima Suleymaan Cartan u soo 27.3.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo kuyaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 qaabkiisuna yahay 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: J I D -

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 391

Galbeed waxaa ka xiga Dhul Lam. 391

a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 393

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 293

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

### *N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Muuse Xaaji Aadan u soo qortey arji uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 377

Koonfur waxaa ka xiga: J I D

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 380

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 382

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 19 MAG, 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. CAYDARUUS C. KEEYNDIID*

L. 294



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D O  D H U L*

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Faarax Raage Jaamac u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha yo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2.5.1977 uu ku weeydiisanaayey Gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W A D D O

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam 451

Galbeed waxaa ka xiga: W A D D O

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam 452

Qofkii danaynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho 26.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keynadiid*

294/Bis

*MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR*

Hadduu Arkay: dacwadda kor ku qoran;

Markuu arkay: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;
Hadduu Arkay: qod. 69 D. L. 9/9/65 N.2; lumid Buuga Keydka Lam. 12619 oy ku qoran tahay di Shs. So. 200/=

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buuga keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Sheekh Cadda Gacal ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 29.5.1977

*Guddoomiyaha Maxkamadda Gobol. Benaadir*
*CABDULLAAHI DAAHIR BARRE*

L. 295



MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Hadduu Arkay: dacwadda kor ku qoran;

Markuu Arkay: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

Hadduu Arkay: qod. 69 D. L. 9/9/65 N. 2; lumidda Buuga keydka Lam. 11964 oy ku qoraη tahay lacag dhan di Shs. So. 2.812

WUXUU AMRAYAA

loo cusbooneysiiyo Buuga keydka ka dib markii ay ka soo wa-
30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

a saar

12.6.1977

*Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka Banaadir*
*CABDULLAAHI DAAHIR BARRE*

L. 295/BIS

## MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADUU ARKAY: qod. 69 D. L. 9/9/65 N. 2; lumidda Buuga Keydka lam. 1614 oy ku qoran diShs. So. 6.095.

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buuga keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Maxamed Xaaji Shiikhey ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la la sugaayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay Muqdisho, 21.6.77

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOL. BANAADIR

*Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Benaadir*
*CABDULAAHI DAAHIR BARE*

L. 295/Biş